

Xaanshida Tilmaamaha Badqabka ee Janitorial

Taxanayaasha tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka si looga hortago dhaawacyada shaqada kadhsha ee warshada janitorial



Hadafka xaanshidan tilmaamta waa inay guudmar gaaban ka bixiso mawduucyada Hogaaminta Bad-qabka ee aan bixineyno. Haddii wax su'aala ah ay ka imaadaan macluumaadka hoose fadlan iimayl inoogu soo dir, weynu jecelnahay inaan warkaaga helno.

Waa maxay Hogaaminta Bad-qabka?

Dadaal iskaashi leh oo mudnaanta lagu siiyo bad-qabka goobta shaqada oo u dhaxeysa:

Loo-shaqeeyaha > Maamulka > Shaqaalahaa

- Hogaamiyeeyasha bad-qabka waxay muhiimad gaar ah ku yeeshaan inay dadka kale ku hogaamiyan inay raacaan tallaaboo yinka bad-qabka.
- Iyyada oo lagu muujiyo siyaasado, habraacyo iyo dhaqamo.
- Hogaaminta bad-qabka ee la dhaqangeliyo waxay abuurtaa dhaqan shaqo oo aragtii fog iyo qiyam u leh

Loo-shaqeeye	Maamulaha/ Kormeeraha	Shaqaalahaa
<p>Wuxuu muujiyaa go'gonaan: Wuxuu u gudbiyaa baq-qabka sida qayimka shirkada, wuxuu bixiyaa siyaasadaha bad-qabka, dhaqaalahaa, tabbabarka, iyo agabka bad-qabka, wuxuu ku tabbabaraa maamulayaasha iyo kormeerayaasha inay sare u qaadaan bad-qabka.</p> <p>Tusaale: Shirkada waxay ku tabbabartaa shaqaalahaa cusub siyaasadaha waxayna u sahashaa helidooda.</p>	<p>Wuxuu muujiyaa go'gonaan: Wuxuu gudbiyaa, aqoonta bad-qab-ka, wuxuu hirgeliyaa siyaasadaha bad-qabka si cadaalad ah, wuxuu ku tabbabaraa shaqaalahaa inay adeeg-sadaan habraacyo iyo dhaqamo ammaan ah. Wuxuu dhageystaa walaa-cyada bad-qabka ee shaqaalahaa.</p> <p>Tusaale: Kormeeraha wuxuu mud-naanta siiyaa bad-qabka isaga oo baddelaya shaqaalahaa xanuunsan baddelki uu u sheegi lahaa shaqaalahaa inay dhaawac halis ugu galaan xaaladaha shaqo ee shaqaalahaa yar.</p>	<p>Wuxuu muujiyaa go'gonaan: Wuxuu u gudbiyaa walaacyada bad-qabka kormeeraha, wuxuu u hogaansamaa siyaasadaha iyo dhaqamada bad-qabka, wuxuu taageeraa bad-qabka shaqaalahaa isla sahaqeeyaan.</p> <p>Tusaale: Shaqaalahaa wuxuu u shaqeeyaa sida xubin koox ka tirsan isaga oo gudbinya baahiyaha bad-qabka, walaacyada, iyo in wadashaqeyn laga helo marki la warsdo ama inuu dalbado caawin markuu u baaahan yahay.</p>

Sifooyinka Hogaaminta Bad-qabka

Maamulka/ (Kormeeraha)

Taageer codka bad-qabka shaqaalahaa adiga oo:

- Abuuraya aaminaad ixtiraam leh
- Dhageysiga wanaagsan
- Dhiirigelinaya kooxda
- Dhibaato xallinta anshaxa

Shaqaalahaa

- La xiriir maamulka marka ay jirto khatar bad-qab oo suurogal ah.
- Wax ka baro bad-qabka si aad naftaada u ilaalso.
- Ka caawi kuwa kula shaqeeyaa inay mudnaanta siiyaa bad-qabka.

Ma aaminsan tahay in maamulkaaga uu u qalabeysan yahay inuu wada-xiriir furan ka sameeyo walaacyo kasta oo bad-qabka ku saasban?



Xaanshida Tilmaamaha Badqabka ee Janitorial

Taxanayaasha tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka si looga hortago dhaawacyada shaqada kadhsha ee warshada janitorial



E

Tusaalooyinka Hogaaminta Bad-qabka

Hoos waxaa ku qoran tusaalaha sida wada-xiriirkha uu u saameyn karo bad-qabka shaqaalaha:

Hogaaminta Bad-qabka Waxtarka leh	Hogaaminta Bad-qabka Liita
<p>Carmen, oo ah shaqaale muddo dheer u shaqeenayay shirkada waxay xiriir adag la leedahay kormeeraheeda. Waxay dareentaa in la taageero waxayna ku qanacsan tahay inay caawin codsato.</p> <ul style="list-style-type: none">• Hawl maalmeedka Carmen waa inay tirtirtaa dhulalka.• Waxay si aday ku tirtirtaa dhulka waayahanba sababta oo xaaqinka ayaa kala daadanayo.• Carmen dhabar xanuun ayaa ku bilowday• Waxay ka codsatay kormeeraheeda inuu u baddelo xaaqinka.• Carmen waxay sugeysaa jawaab-celin waxayna toddobaadki ku xigay ku xasuusisay shaqada.• Kormeeraha wuxuu si daacad ah ugu sheegay inuu illoobay wuxuuna kala hadlay Carmel, sida loo helo xal badbaado leh.• Kormeeraha wuxuu u dhageystaa si taxadar leh, wuxuu ka shaqeeyaa inuu xaliyo arinka isla markaaba wuxuuna soo helay xaaqin cusub oo bad-qab weyn leh. 	<p>Julio wuxuu ku dhibaatoonayaa shaqada markii uu kormeerahiisa uu ku guuldareysto inuu xaliyo arrimahiisa agabka. Sidi hore si laba goor ka dhib badan ayuu ku shaqeeyaa.</p> <ul style="list-style-type: none">• Hawl maalmeedka Julio waa inuu tirtiro dhulalka.• Wuxuu si aday ku tirtiraad dhulka waayahanba sababta oo xaaqinka ayaa kala daadanayo.• Julio dhabar xanuun ayaa ku bilowday.• Julio wuxuu sii wadaa inuu xaaqo balse dhulka wali waa wasaq. Wuxuu ka walwelaa macaamiisha inay soo cawdaan.• Wuxuu si labalabeyn ah ugu tagay kormeerahiisa si loo siyo xaaqin baddel ah.• Kormeerahiisa ayaa u hanjabay asaga oo ku dhahay "Shaqo ma rabtaa maya ama haa?"• Julio wuxuu dareemaya in la cabsi geliyay wuxuuna sii wadaa xaaqida inaksta oo dhabarka xanuunayo.• Julio wuxuu tixgelinayaa inuu xareeyo dacwad balse wuxuu ka cabsanayaa inuu shaqadiisa ku waayo haddii uu sidaas sameeyo. 

Ray'i ahaantaada, muxuu kormeeraha (labada tusaalaba) u sameyn lahaa sidaas si ka duwan?

Hogaaminta bad-qabka waxtarka leh waxay ka dhix dhacdaa dhaqan bad-qab halkaas oo kormeerayaasha lagu qalabeeyo aqoonta bad-qabka, go'gonaanta, iyo xirfado wada-xiriir oo adag oo dhisa xiriiro wanaagsan. Shirkada noocaas ah, Julio ma ahan inuu ku shaqeeyo dhaawac ama walwel kuwaas oo ka dhasha ixtiraam la'aanta iyo dhaqanka xun ee uu la kulmayo.

U go'gonaanta hogaaminta bad-qabka waxay waxtar u leedahay in la ilaaliyo nadiifiyeeyasha Washington



Si aad maclumaaad dheeri ah uga ogaato daraasada,
wac ama fariin qoraal udir ama iimeel udir SHARP
360-819-7908 • 1-888-667-4277 • JanitorStudy@Lni.wa.gov
Nambarka Waxbixinta SHARP: 102-92-2021

